

Badqabka iyo Maalgelinta Daryeelka Carruurta

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo (Frequently Asked Questions)



Waxda Carruurta Dhalinyarada iyo Qoyska (Department of Children, Youth, and Families, DCYF) waxay qiimeysaa bixiyeyaasheena daryeelka carruurta ee shaatiga haysta waxayna si qoto dheer uga mahadcelisaa shaqada muhiimka ah ee ay maalin kasta qabtaan si ay u daryeelaan una wax baraan ardaydeena ugu yar. Badqabka iyo wanaagga carruurta—iyo xirfadlayaasha u heellan ee daryeela iyaga—waxay weli ahaanaysaa mudnaantayada ugu weyn.

DCYF waxay bixineysaa ilahan FAQ si loo daboolo su'aalaha aan ka helnay bixiyeyaasha daryeelka carruurta. Tani waxaa loogu talagalay oo keliya ujeedooyin macluumaad guud ah mana ahan talo sharci. Bixiyeyaasha la kulma xaalado gaar ah waa inay la tashadaan ciidamada sharciga ee deegaanka, qareen gaar ah, ama xirfadlayaal kale oo aqoon u leh si ay u helaan talo ku habboon duruufahooda.

Waad ku mahadsan tahay daryeelka badqabka iyo naxariista leh ee aad u fidiso carruurta iyo qoysaska ku nool bulshooyinkaaga.

Hoos waxaa yaala xirriiyaasha isgaarsiinta ee la sii daayay illaa iyo hadda:

- Farriin ku socota Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee ku saabsan Maalgelinta Federaalka iyo Badqabka Bixiyeyaasha Daryeelka: <https://dcyf.wa.gov/news/message-child-care-providers-regarding-federal-funding-and-provider-safety-espanol-soomaali>
- Farriin ku socota Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee loogu jawaabaya Caymiska Warbaahinta ee Socota: <https://dcyf.wa.gov/news/message-child-care-providers-response-ongoing-media-coverage-english-espanol-soomaali-francais>
- Bayaanka DCYF ee Ka Jawaabaya Warbaahinta Socota ee Ku Saabsan Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta: <https://www.dcyf.wa.gov/news/dcyf-statement-response-ongoing-media-coverage-surrounding-child-care-providers>

Gelitaanka Goobta iyo Taageerada Bixiyeyaasha Daryeelka

- S** **Miyaa bixiyeyaasha daryeelka carruurta loogu baahan yahay inay u oggolaadaan warbaahinta, baraha bulshada, ama dad aan la aqoon inay galaan xarumaha daryeelka carruurta?**
 - J** *Maya. Sida ganacsi gaar ah ahaan, bixiyeyaasha lagama rabo inay u oggolaadaan dadweynaha inay galaan xarumaha daryeelka carruurta. Tani waxaa ku jira warbaahinta iyo dhammaan dadka aan la aqoon.*
- S** **Miyaa bixiyeyaasha daryeelka carruurta loo oggolyahay inay qufulaan albaabada oo xaddidaan gelitaanka inta lagu jiro saacadaha shaqada si ay u ilaashadaan carruurta iyo shaqaalaha?**
 - J** *Haa. Barnaamijyada waxay qufulan karaan albaabada si loo ilaaliyo carruurta iyo shaqaalaha, haddii albaabada xaaladaha degdegga ah ee laga baxo ahaadaan kuwo la adeegsan karo oo laga furi karo gudaha (Xeerkar Maamulka Gobolka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 110-300-0166 <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0166>). Bixiyeyaashu waxay la xiriiri karaan shaati-bixiyahooda haddii ay su'aalo ka qabaan albaabada laga baxo xaaladaha degdegga ah.*
- S** **Maxaa loo tixgeliyaa inay tahay goob dadweynaha ka dhexeeya, iyo talaabooyinka aan la oggolayn xitaa marka qof ku sugan yahay goob dadweyne? Ma jiraan kala duwanaansho u dhexeeya goob dadweyne oo ay maamusho xarun iyo mid uu maamulo bixiyaha daryeelka carruurta ee guriga qoyska?**
 - J** *Guud ahaan, goobaha dadweynaha waa aagag si xor ah loogu heli karo qof kasta iyada oo aan oggolaansho laga qaadan, sida jidadka dadweynaha, waddooyinka, dariiqaha, iyo jardiinooyinka. Meelahan dadweynaha, shakhsiyadku waxay daawan karaan ama duubi karaan waxa si cad u muuqda (tusaale ahaan, duubista dibadda dhismaha, daaqaadaha, ama guri). Ganacsiyada gaarka loo leeyahay—sida barnaamijyada daryeelka carruurta iyo guryaha ay ka maamuli karaan ganacsigooda—looma tixgeliyo meel dadweyne ahaan. Waxaad xaq u leedahay inaad qof ka codsato inuu ka baxo gurigaaga haddii aysan ahayn meel dadweyne ka dhexeeya.*



S Sidee bay bixiyeyaasha daryeelka carruurta u xaqiijin karaan aqoonsiga shaqaalaha DCYF ka hor inta aysan gelin?

J Shaqaalaha DCYF ee booqanaya xaruntaada waa inay si cad u muujiyaan baasaskooda DCYF, isku soo bandhigaan, oo sharaxaan ujeeddada booqashadooda. Booqashooyinka aan la ogeysiin, shaati-bixiyeyaashu waxay kula xiriiri doonaan bixiyaha (wac ama fariin qoraal u dir) marka ay goobta joogaan booqashada aan la ogeysiin. Bixiyeyaashu way wici karaan xafiska shaati-bixinta daryeelka carruurta ee DCYF ee deegaanka (DCYF Child Care Licensing office) (<https://dcyf.wa.gov/find-an-office/el-offices>) si ay u xaqiijiyaan aqoonsiga shaatiga.

S Maxay tahay tallaabooyinka inay qaadaan looga bahanyahay bixiyeyaasha daryeelka carruurta haddii ay dareemaan khatar ama cabsi la xiriirta dhibaateyn, duubis, ama cabsi-gelin? Maxay tahay inay bixiyeyaashu sameeyaan haddii shakhsiyad u yimaadaan koox ahaan, xirtaan waji gashiyo, ama si isdaba joog ah u yimaadaan si ay u duubaan ama u su'aal uga weydiyaan?

J Badbaadada carruurta iyo dadka daryeela waa mudnaanta ugu sarreysa ee DCYF. Qofna ma aha inuu dareemo hanjabaad ama cabsi-gelin inta uu daryelayo carruurta. Bixiyeyaashu daryeelka waa inay mudnaanta siiyaan badbaadada. Haddii qof uu ku jiro khatar degdeg ah, wac 911. Haddii ay suurtagal tahay, u wareeji carruurta meel ammaan ah oo ka fog carqalad kasta. Haddii aysan jirin khatar degdeg ah ama halis waxyeello, wac ciidamada sharciga ee deegaanka oo si toos ah ula shaqee si arrimahan loo xalliyo. Sidoo kale waa inaad u soo sheegtaa xaaladahan ruqsad-bixiyahaaga sida ugu dhaqsaha badan. Haddii aad la kulantay dambiyo nacayb ama dhacdo cunsuriyad ah, waxaad taas u soo sheegi kartaa Xafiska Xeer Ilaaliyaha (Attorney General's Office) Guud adigoo adeegsanaya macluumaadka hoose.

- Khadka Wicitaanka ee Dambyada Nacaybka & Dhacdooyinka Cunsuriyadda: 1-855-225-1010 (Turjubaanada waa la heli karaa Isniin ilaa Jimce, 9 a.m. ilaa 5 p.m.)
- Khadka tooska ah www.atg.wa.gov/report-hate

S Waa maxay taageerada iyo hagitaanka DCYF ay bixin karto marka bixiyeyaashu daryeelka la kulmaan dhibaateyn, cabsi-gelin, ama walaac badbaado?

J Qofna ma aha inuu dareemo hanjabaad, dhibaateyn, ama cabsi-gelin inta uu daryelayo carruurta. Xaaladahan, dhibaateynta, cabsi-gelinta, iyo walaacyada badbaadada waa in loo maraa wadooyinka sharciga iyo kuwa ciidamada sharciga ee ku habboon. DCYF waxay bixisaa taageero farsamo si bixiyeyaashu daryeelka u sii wadaan daryeelka carruurta ee deggan, ammaan ah, oo aan la carqaladeyn. Bixiyeyaasha daryeelka la kulma walaacyadan waxay la xiriiri karaan shati-bixiyahooda si ay u helaan taageero farsamo.



S Sidee DCYF ula shaqeesaa ciidamada sharciga marka bixiyeyaashu daryeelka la kulmaan gelid aan la oggolayn, dhibaateyn, ama hanjabaad ku saabsan badbaadada carruurta?

J DCYF ma aha hay'ad ciidamada sharciga ah mana fuliso baaritaanno dambiyeed. Si kastaba ha ahaatee, badbaadada carruurta iyo bixiyeyaasha daryeelka waa mudnaanteena ugu weyn. DCYF waxay si dhab ah u qaadataa dhammaan warbixinada ku saabsan hanjabaadaha, dhibaateynta, gelidda aan la oggolayn, iyo walaacyada kale ee saameeya bixiyeyaasha. Meesha ugu dambeysa, haddii DCYF hesho warbixin ku saabsan eex, dhacdooyinka nacaybka, ama dhibaateynta, waxaanu macluumaadka la wadaagi doonaa ama u gudbin doonaa Xafiska Xeer Ilaaliyaha Guud, kaasoo leh Xarunta Wicitaanka Degdegga ah ee Dambyada Nacaybka & Dhacdooyinka Eexda. DCYF iyo xafiska xeer-ilaaliyaha guud (Attorney General's Office, AGO) waxay leeyihiin wada xiriiri oo ku aadan dhibaateynta ay soo sheegeen bixiyeyaasha daryeelka.

- Khadka Wicitaanka ee Dambyada Nacaybka & Dhacdooyinka Cunsuriyadda: 1-855-225-1010 (Turjubaanada waa la heli karaa Isniin ilaa Jimce, 9 a.m. ilaa 5 p.m.)
- Khadka tooska ah www.atg.wa.gov/report-hate

S Ma la oggol yahay in la duubo ama la sawiro carruurta, albaabada xarunta daryeelka carruurta, ama howlaha xarunta daryeelka carruurta iyada oo aan oggolaansho waalid ah la helin?

J Bixiyeyaasha daryeelka carruurta waxaa waajib ku ah sida ku xusan WAC 110-300-0450 (<https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0450>) inay helaan oggolaanshaha waalidka ama ilaaliyaha ka hor inta aysan sawirin, duubin muuqaal, ama kormeerid ku sameyn carruurtooda. Bixiyeyaasha daryeelka lagama rabo inay u oggolaadaan warbaahinta ama dad aan la aqoon inay galaan xarumaha daryeelka carruurta. Guud ahaan, duubista iyo duubista waxa si cad u muuqda ee laga arki karo meelaha dadweynaha—oo ay ku jiraan carruurta, albaabada xarumaha daryeelka carruurta, iyo howlaha xarumaha daryeelka carruurta—ma aha wax ka mamnuuc ah xubnaha guud ee dadweynaha. Haddii muuqaal duubistas ama duubista noocaas ahi halis degdeg ah geliso qof, wac 911. Haddii aysan jirin khatar degdeg ah ama halis waxyeello, wac ciidamada sharciga ee deegaanka oo si toos ah ula shaqee si arrinta loo xalliyo.

Hubinta Daryeelka Carruurta (Child Care Check) iyo Macluumaadka Bixiyaha Daryeelka

S Waa maxay ujeeddada Child Care Check?

J Child Care Check waa qalab online ah oo ay maamusho DCYF si uu uga caawiyo daryeelayaasha inay raadiyaan daryeel carruur tayo leh. Waalidiinta, qoysaska, iyo dadka kale waxay ka heli karaan macluumaad ku saabsan barnaamijyada daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore ee gaarka ah ee Washington state. DCYF sidoo kale waxaa waajib ku ah inay ku wadaagto natiijooyinka kormeerka iyo warbixinada baaritaannada caafimaadka iyo badbaadada ee dhammaan bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee u qalma oo shatiyeesan bogga Child Care Check, si waafaqsan shuruudaha Federaalka 45 Xeerarka Federaalka ee (Code of Federal Regulations, CFR) 98.33 (<https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0450>).


S Ma lagu soo bandhigaa cinwaannada bixiyeyaasha gudaha Hubi Child Care Check?

J Si caadi ah, magaalooyinka iyo lambarrada boostada ee bixiyaha waxaa lagu soo bandhigaa kaliya bixiyeyaasha daryeelka ku bixiya Guriga Qoyska. Hindise Sharciiyadka Gobolka Washington 150 (WA Initiative 150) (https://www2.sos.wa.gov/_assets/elections/initiatives/finaltext_1024.pdf) waxay ka hor istaagtaa DCYF inay la wadaagto cinwaanada buuxa ee Bixiyeyaasha Guriga Qoyska ilaa bixiyuhu uu oggolaado in cinwaankooda buuxa la soo bandhigo. Daryeelka carruurta kale ee shatiyeesan (xarumaha, Ku Saleysan Dabiiciga Banaanka, iyo barnaamijyada carruurta da'da dugsi), cinwaannada buuxa waxaa lagu soo bandhigaa bogga Child Care Check.



S Sidee bay bixiyeyaasha daryeelka carruurta u cusboonaysiin karaan macluumaadka lagu soo bandhigay Child Care Check?

J Tilmaamaha bixiyeyaasha ee ku saabsan sida loo cusboonaysiin karo qaar ka mid ah macluumaadka lagu soo bandhigay Child Care Check waxaa laga heli karaa Waraaqaha Taloooyinka ee Bogga Bixiyaha Daryeelka oo ku yaala tab-ka Caawimaadda (the Provider Portal Tip Sheets under the Help tab). Haddii aad u baahan tahay caawimaad ku saabsa Bogga Bixiyaha Daryeelka (Provider Portal), fadlan la xiriiir shati-bixiyahaaga.



Hoos waxaa ku yaala qaar ka mid ah xaashiyaha taloooyinka oo laga yaabo inaad ka hesho faa'iido.

- Si aad ugu doorato ama uga baxdo muujinta cinwaanka buuxa ee Bixiyeyaasha Daryeelka Guriga Qoyska gudaha Child Care Check: **Doorashada in la muujiyo Cinwaanka Guriga Qoyska:**
 - Gal Boga Bixiyaha Daryeelka ee WA Compass (Washington State Compass Provider Portal) (<https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/wacompass-login.pdf>)
 - Guji tabka macluumaadka Child Care Check (Child Care Check Info Tab)
 - Guji sanduuqa si aad uga qaaddo calaamadda ee Sanduuqa “Muuji cinwaanka ku yaala Child Care Check” (“Show address on Child Care Check”).
 - Guji badhanka cagaaran ee Cusboonaysii (the green Update button) si aad u keydiso isbeddellada.
- Si aad ugu darto ama u cusboonaysiiso luqadda, bogga websaydka, iyo macluumaadka shahaadooyinka ee ka muuqda Child Care Check: **Ku Daridda iyo Cusboonaysiinta Macluumaadka ka Muuqda Child Care Check**
- Si aad u cusboonaysiiso Saacadaha shaqada ee ku jira Child Care Check: **Beddelidda Jadwaladaada**
- Si aad ugu darto boosaska bannaan\ furan ee Child Care Check: **Kudarista Boosaska Bannaan ee lagu soo bandhigo Child Care Check**



S Marka laga reebo Qalabka Maareynta Waxbarashada iyo Diiwaangelinta Xogta (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT) iyo Child Care Check, waa maxay nidaamyada kale ee Washington state ee lagu soo bandhigo cinwaannada xarumaha daryeelka carruurta?

J DCYF waxay hayaan diiwaannada gudaha ee shati-siinta oo leh cinwaannada xarumaha ujeedooyinka xeer-dejiinta. Bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee qaata maalgelinta dowladda iyo federaalka waxaa lagu soo dari doonaa nidaamyada aan DCYF ahayn, kuwaas oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, Xafiiska Maareynta Maaliyadda (Office of Financial Management, OFM) websaydka Kharashka Ay Adeegsato Dowladda (State Spending) (<https://fiscal.wa.gov/Spending/Checkbook>), websaydka, Raadinta libiyeyaasha Heer-Gobol (Statewide Vendor Lookup) (<https://ofm.wa.gov/tech-support/statewide-vendor-payee-services/statewide-vendor-number-lookup/>) iyo Bogga Xogta Furan (Open Data Portal) (<https://data.wa.gov/>) ee WaTech. Dhammaan goobahan ma shaaciyaan cinwaannada dhammaan xarumaha daryeelka carruurta. Sida ganacsi gaar ah ahaan, macluumaadkaaga waxaa laga yaabaa inuu ka muuqdo nidaamyada kale oo DCYF laga yaabo inaanay ka warqabin.

Macluumaadka lagu hayo MERIT iyo WA Compass (Washington State Compass) si fudud looma heli karo dadweynaha iyada oo aan la samayn codsi shaacinta dadweynaha, laakiin qaar ka mid ah macluumaadka sida shati-siinta, macluumaadka xarunta, iyo heerka ka-qaybgalka Early Achievers ayaa lagu soo bandhigayaa Child Care Check.

S Maxay yihiin tallaabooyinka DCYF ay qaadi karto marka ay jiraan caddeymo lagu kalsoonaan karo oo muujinaya in Child Care Check ama hababka cabasho loo isticmaalo si khaldan iyada oo lagu beegsanayo bixiyeyaasha iyadoo lagu saleynayo astaamo la ilaaliyo?

J DCYF waxaa ka go'an ula dhaqamida cadaaladda ah ee dhammaan bixiyeyaasha shatiyeysan waxayna cambaareysaa wax kasta oo takoorka, dhibaateynta, ama ku xad-gudubka nidaamyada ama habraacyada hay'adda ah. Marka caddeymo lagu kalsoonaan karo ay muujinayaan in qalabyada sida Child Care Check ama hababka cabashada loo isticmaalo si khaldan iyada oo lagu beegsanayo bixiyeyaasha daryeelka iyadoo lagu saleynayo astaamo la ilaaliyo, DCYF waxay la shaqayn doontaa Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud, oo ay ku jirto ugu gudbinta dambiyada nacaybka iyo dhacdooyinka eexda ee suurtoogalka ah, isla markaana isku kaashan doonaan baaritaanno kasta oo ay wadaan ciidamada sharciga.

Child Care Check waxaa loo sameeyay in uu ka caawiyo qoysaska inay helaan daryeel shaatiyeysan oo tayo leh isla markaana kor loogu qaado hufnaanta iyada oo la raacayo shuruudca shaacinta dadweynaha ee Washington state. DCYF mas'uul kama aha wax kasta oo ku xad-gudub ah isticmaalka macluumaadka dadweynaha ee ay sameeyaan dhinacyada saddexaad.

S Sidee DCYF u kala soocdaa cabashooyinka lagu sameeyay si daacadnimo leh iyo warbixinada aargoosi ama wadajir ah ee loogu talagalay in lagu cabsi-geliyo bixiyeyaasha daryeelka? Waa maxay dib-u-eegista, kor u qaadista, ama calaamadeynta ee jira gudaha?

J DCYF iyo la-hawlgalayaasheeda waxay dib u eegaan dhammaan cabashooyinka iyo warbixinada ku saabsan khiyaano suurtagal ah oo la xiriira bixinta lacagaha. Waxaan dib u eegnaa saxnaanta warbixinta waxaana mudnaanta siinnaa warbixinada lagu daba-gali doono iyadoo lagu saleynayo caddeynta, eedeeynta, iyo macluumaadka la soo sheegay. DCYF waxay dib u eegtaa dhammaan cabashooyinka ku saabsan bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee shaatiyeeynta. Waxaan baari doonaa cabasho haddii ay sheeganayso ku xad-gudub shati-siineed ama haddii ay gaarto heerka ku xad-gudub ama dayacaad carruur. Haddii qof uu si joogto ah u soo sheego warbixinno ku saabsan xad-gudub ama dayacaad carruur qaab u muuqata dhibaateyn, waxaanu bixin karnaa digniin ku saabsan warbixinno been abuur ah sida ku cad Xeerarka Dib-u-habeysan ee Gobolka Washington (Revised Code of Washington, RCW) 26.44.061 (<https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=26.44.061>).

Qof kasta oo ka shakisan khiyaano ku saabsan deeqda daryeelka carruurta waa inuu soo sheego isagoo wacaya 1-800-562-6906 ama adeegsanaya Xafiiska Khiyaanada iyo Isla-Xisaabtanka (Office of Fraud and Accountability) | Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services, DSHS) (<https://www.dshs.wa.gov/ffa/office-fraud-and-accountability>) qalabka warbixinta onlaynka ah. DCYF waxay si dhab ah u qaadataa warbixinadan waxayna la shaqeysaa the Office of Fraud and Accountability (ee ku dhex yaala Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (the Department of Social and Health Services)) si loo hubiyo in doolarka canshuur-bixiyeyaasha aan si khaldan loo isticmaalin.

S Sidee ayey DCYF u maamushaa Child Care Check iyada oo la waafajinayo ballanqaadyadeeda cadaaladda iyo ka hortagga takoorka, gaar ahaan soo galootiga, qaxootiga, iyo bixiyeyaasha dadka midabka leh ee horey ula kulma baaris aan loo sinnayn?

J DCYF waxaa ka go'an ula dhaqamida cadaaladda ah ee dhammaan bixiyeyaasha shatiyeysan waxayna cambaareysaa wax kasta oo takoorka, dhibaateynta, ama ku xad-gudubka nidaamyada ama habraacyada hay'adda ah. Sharciyaha Deeqaha Federaalka ee Horumarinta iyo Daryeelka Carruurta (Federal Child Care and Development Fund, CCDF) waxay gobolada uga baahan yihiin inay lahaadaan websayd waxbarasho oo loogu talagalay macaamiisha kaasoo leh liis bixiyeyaasha daryeelka oo laga raadin karo. DCYF waxay buuxisay shuruudahan, qayb ahaan, iyadoo ka shaqeynaysa Child Care Check. Macluumaadka bixiyeyaasha daryeelka ee lagu siiyay dadweynaha Child Care Check waxaa ku jira qodobbada lagu taxay bogga websaydka ee Child Care Check (Child Care Check webpage) (<https://www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/child-care-check>). Macluumaad gaar ah waxaa ilaaliya sharcigu mana loo heli karo dadweynaha, oo ay ku jiraan macluumaadka aqoonsiga ee bixiyeyaasha daryeelka Guriga Qoyska ee shaatiyeysan. Macluumaadka waxaa lagu bixiyaa iyada oo aan loo eegin midabka, diinta, jinsiga, ama aqoonsiga galmada, taasoo waafaqsan sharciga federaalka iyo kan gobolka iyo ballanqaadyada DCYF ee cadaaladda iyo ka hortagga takoorka.

S Waa maxay isbeddellada DCYF samayn karto ee farriimaha dadweynaha ka muuqda Child Care Check si loo caddeeyo macluumaadka la soo bandhigay iyo ujeeddada macluumaadkaas?

J Macluumaadka lagu soo bandhigay Child Care Check iyo ujeeddadiisa waxaa laga heli karaa bogga websaydka ee Child Care Check (Child Care Check webpage) (<https://www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/child-care-check>). DCYF waxay baareysaa sida farriimaha loo caddeeyo, oo ay ku jiraan suurtagalnimada in lagu daro qoraallo sharaxaya ujeeddada Child Care Check.

S DCYF ma soo saari doontaa tilmaamo degdeg ah oo aqoonsanaya isticmaalka khaldan iyo dhibaateynta, isla markaana caddeynaya in Child Care Check iyo nidaamyada cabashada loogu talagalay arrimaha badbaadada ee daacadnimo leh, ee aan loogu talagelin beegsiga wadajirka ah? Ma tilmaami doontaa in dhibaateynta, warbixinta aargoosiga, ama isticmaalka khaldan ee ku saleysan midabka la qaado si dhab ah oo loo mariyo dib-u-eegis gudaha ah?

J Child Care Check waxaa loo sameeyay in uu ka caawiyiyo qoysaska inay helaan daryeel shatiyeysan oo tayo leh isla markaana kor loogu qaado hufnaanta, iyadoo la raacayo shuruucda shaacinta dadweynaha ee Washington state. DCYF mas'uul kama aha wax kasta oo ku xad-gudub ah isticmaalka macluumaadka dadweynaha ee ay sameeyaan dhinacyada saddexaad. DCYF waxay baareysaa sida farriimaha loo caddeeyo, oo ay ku jiraan suurtagalnimada in lagu daro qoraallo sharaxaya ujeeddada Child Care Check.

S Miyey DCYF si guud uga cambaareyn doontaa dhibaateynta iyo isticmaalka khaldan ee nidaamyada hufnaanta iyadoo lagu beegsanayo isirka? Miyey DCYF dib ugu adkeyn doontaa qiimaha dhammaan bixiyeyaasha daryeelka hore iyo waxbarashada carruurta?

J DCYF waxaa ka go'an ula dhaqamida cadaaladda ah ee dhammaan bixiyeyaasha shatiyeysan waxayna cambaareysaa wax kasta oo takoorka, dhibaateynta, ama ku xad-gudubka nidaamyada ama habraacyada hay'adda ah. DCYF waxay mar kale xaqiijineysaa qiimaha bixiyeyaasha gaarka ah ee maalin kasta u adeegaya qoysaska iyo carruurta, oo go'aankooda ku aaddan yahay la shaqeynta bixiyeyaashan si loo kordhiyo helitaanka daryeel hore oo badqab ah, tayo sare leh, iyo waxbarasho. Hoos waxaa ku qoran xiriiriyeyaasha farriimaha la sii daayay ilaa hadda:

- Farriin ku socota Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee ku saabsan Maalgelinta Federaalka iyo Badqabka Bixiyeyaasha Daryeelka (<https://dcyf.wa.gov/news/message-child-care-providers-regarding-federal-funding-and-provider-safety-espanol-soomaali>)
- Farriin ku socota Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee loogu jawaabaya Caymiska Warbaahinta ee Socota (<https://dcyf.wa.gov/news/message-child-care-providers-response-ongoing-media-coverage-english-espanol-soomaali-francais>)
- Bayaanka DCYF ee Ka Jawaabaya Warbaahinta Socota ee Ku Saabsan Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta (<https://www.dcyf.wa.gov/news/dcyf-statement-response-ongoing-media-coverage-surrounding-child-care-providers>)

Child Care Check waxaa loogu talagalay inay ka caawiso qoysaska helitaanka daryeel tayo leh oo shatiyeysan iyo inay dhiirrigeliso hufnaanta, iyadoo la raacayo shuruucda daah-furmaanta dadweynaha ee Gobolka Washington. DCYF mas'uul kama aha wax kasta oo ku xad-gudub ah isticmaalka macluumaadka dadweynaha ee ay sameeyaan dhinacyada saddexaad.

Deeqda Daryeelka Carruurta iyo Lacagaha Kaabista

S Sidee bixiyeyaashu uga jawaabi doonaan haddii xubno ka tirsan dadweynaha ay soo bandhigaan welwel ama eedeymo ku saabsan khiyaano?

J Mas'uuliyadda ugu weyn ee bixiyeyaasha daryeelka waa badqabka iyo daryeelka wanaagsan ee carruurta ay ugu daryelaan daryeelkooda. Bixiyeyaasha daryeelka looma baahna inay ka wada hadlaan eedeymaha, faahfaahinta barnaamijka, ama deeqaha daryeelka carruurta xubnaha dadweynaha.

Qof kasta oo ka shakisan khiyaano ku saabsan deeqda daryeelka carruurta waa inuu soo sheego isagoo wacaya 1-800-562-6906 ama adeegsanaya Xafiiska Khiyaanada iyo Isla-Xisaabtanka (Office of Fraud and Accountability) | Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services, DSHS) (<https://www.dshs.wa.gov/ffa/office-fraud-and-accountability>) qalabka warbixinta onlaynka ah. DCYF waxay si dhab ah u qaadataa warbixinadan waxayna la shaqeyso Xafiiska Khiyaanada iyo Mas'uuliyadda (Department of Social and Health Services) si loo hubiyo in lacagta canshuur-bixiyeyaasha aan si khaldan loo isticmaalin.

S Waa maxay hanaanka DCYF ee bixinada lacagaha iyo kormeerka barnaamijada deeq kaabista daryeelka carruurta?

J Warbixinta Lacagaha Kaabista ee Barnaamijka Deeqda Daryeelka Carruurta (Child Care Subsidy Program Overpayment Report) (<https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/reports/child-care-subsidy-program-overpayment-2025.pdf>) ee DCYF waxay bixisaa faahfaahinta habraacan, iyo sidoo kale xogta ku saabsan lacagaha ka badhay. Barnaamijka deeqda daryeelka carruurta, DCYF waxay bixisaa lacagaha bixiyeyaasha kadib marka adeegyada la bixiyo. Bixiyeyaashu waxay helaan khaan sheegto bille ah, waxayna ku dalbadaan lacagta iyadoo lagu saleynayo adeegyada ay bixiyeen iyo xaqooda ay u leeyihiin inay helaan.

DCYF waxay sameysaa kormeerro aan kala sooc lahayn iyo kuwo diiradda saaraya go'aannada u-qalmiitaanka qoysaska, oggolaanshaha bixiyeyaasha daryeelka, iyo bixinta lacagaha bixiyeyaasha daryeelka. Kormeerka lacagaha bixiyeyaasha waxaa ku jira dib-u-eegista ka-qaybgalka iyo diiwaannada kale si loo hubiyo inay la jaanqaadayaan qoysaska loo oggolaaday inay helaan deeqaha daryeelka carruurta.

S Sidee ayuu bixiyaha daryeelka carruurta u muujin karaa inay mas'uul ka yihiin dhaqaalaha lacagaha gobolka/federaalka ee uu helo sida deeqda daryeelka carruurta ama deeqaha waxbarashada hore?

J Sida ku cad WAC 110-300-0455 (<https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx/default.aspx?cite=110-300-0455>), bixiyeyaashu waa inay hayaan diiwaannada ka-qaybgalka daryeelka carruurta. Bixiyeyaashu daryeelka sidoo kale waa inay haystaan risiidhyo iyo diiwaanno sax ah oo ku saabsan kharash gareynta lacagaha deeqaha Deeqaha Baahiyaha Gaarka ah ee Daryeelka Carruurta (Child Care Complex Needs Fund), Baahiyaha Gaarka ah ee Barnaamijka Hore ee Waxbarashada iyo Daryeelka Carruurta (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP) Deeqaha Sinnaanta (Equity Grants), iyo Deeqaha Ku Saleysan Baahiyaha (Needs-Based Grants) ee la helay.

S Yaa sharci ahaan loo oggolyahay inuu baaro bixiyeyaasha daryeelka carruurta si loo hubiyo u hoggaansanaanta ruqsadda ama deeqda daryeelka carruurta?

J Waaxda Ruqsad-siinta ee DCYF, Adeegyada Ilaalinta Carruurta (Licensing Division, Child Protective Services, LD CPS) sharci ahaan waa la oggol yahay inay baaraan bixiyeyaasha daryeelka carruurta marka lagu eedeeyo xadgudub ama dayacaad carruur. Shati-siinta Daryeelka Carruurta ee DCYF waxaa loo oggol yahay inay baaraan eedeymaha ku saabsan xadgudubyada xeerarka ruqsadda.

Marka laga hadlayo u hoggaansanaanta deeqda daryeelka carruurta, DCYF waxay la shaqeysaa hay'adaha iskaashiga, oo ay ku jirto Xafiiska Khiyaanada iyo Isla-Xisaabtanka ee Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services), kaasoo dib-u-eegis ku sameeya dhammaan cabashooyinka iyo warbixinada la xiriira khiyaano suurtagal ah oo ku saabsan lacag-bixinta. Waxaan dib u eegnaa saxnaanta warbixinta waxaana mudnaanta siinnaa warbixinada lagu daba-gali doono iyadoo lagu saleynayo caddeynta, eedeynta, iyo macluumaadka la soo sheegay.

Kaliya hay'adaha dowladda ee la oggolyahay iyo mas'uuliyiinta sharci ahaan awood u leh inay baaraan bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee shatiyeyan si loo hubiyo u hoggaansanaanta heerarka ruqsadda ama barnaamijyada deeqda. Hay'adahan iyo doorkooda waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, waxyaabaha soo socda:

- DCYF waxay baartaa shaati-siinta daryeelka carruurta iyo kormeerka barnaamijyada.
- Xafiiska Khiyaanada iyo Isla-Xisaabtanka ee Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services Office) wuxuu maamulaa warbixinada ku saabsan khiyaanada la xiriirta deeqda daryeel kaabista carruurta.
- Washington State Auditor's Office wuxuu baaritaan ama kormeer ku sameyn karaa arrimo dhaqaale oo gaar ah.
- Ciidamada ammaanka ee deegaanka iyo dacwad-oogayaasha waxay baaritaan samayn karaan marka fal dambiyeed laga shakisanyahay.

